UnityPoint Health

Cinwaanka: Biilashada iyo Ururinta 1.BR.40

Taariikhda Dhaqangalka: 01/01/2016

SIYAASADDA: Nidaamka Caafimaadka Iowa, d/b/a Cusbitaalada UnityPoint Health ("UPH") waxay si caddaalad iyo joogto ah ugu soo dallici bukaanada biilasha adeegyada daryeelka caafimaad ee la siiyey. Dhammaan bukaanada awooda u leh dhaqaale ahaan inay bixiyaan qayb kamid ah kharashka daryeelka caafimaadkooda. Cusbitaalada UPH waxay qaadi tallaabooyin si ay uga soo ursursadaan lacagaha taagan bukaanada adeegyada daryeelka caafimaad la siiyey.

BAAXADDA: Dhammaan Cusbitaalada UPH iyo Ururrada Cusbitaaladu (oo la isku yidhaadho "Cusbitaalada UPH") kuwaasi oo ah cashuur ka dhaafista 501(c)(3). Jadwalka Awaa liis ah Adeegyada Cusbitaalada kuwaasi oo lagu daboolay siyaasaddan.

MABAADII'DA: Bukaanada awooda inay iska bixiyaan qayb kamid ah kharashka daryeelka caafimaadkooda waxa saaran inay raadsadaan caymis ay heli karaan kana bixiya qayb kamid ah adeegyada daryeelka caafimaadkooda, Cusbitaalada UPH-na waxa saaran inay ka raadsadaan lacagahooga Bukaanadaas.

Ujeedada siyaasaddan waa iftiiminta hababka ay isticmaalaan Cusbitaalada UPH biil ku dallicidda Bukaanada adeegyada daryeelka caafimaad ee la siiyey, iyo ku ursursiga xisaabaad xaaladaha Bukaanadu ayna si habboon u bixin kharashka daryeelkaas caafimaad.

1. Qeexdimaha.

   1.1 Bukaanada. Waxa kamid ah bukaanka iyo/ama cidda ka masuulka ah bukaanka (waalid, wakiil, kafiil).

   1.2 Daryeelka Caafimaad ee Gurmadka ah. Sida ku qeexan Xeerka Daawaynta Caafimaad ee Gurmadka iyo Shaqaalaha (EMTALA), xaalad caafimaad oo ku calaamadsan astaamo kulul oo darnaansho ku filan leh kuwaasi oo ka maqnaanta daryeel caafimaad oo degdeg ah macquul ahaan la fili karo inay keenaan badista caafimaadka bukaanka khatar, dhantaalid halis ah ee shaqada jidhka, ama talax-gab qayb kamid ah xubnaha jidhka. Sidoo kale waxa kamid ah haweenay uur leh oo foolanaysa.

   1.3 Cusbitaal. Waxa kamid ah cusbitaalka daryeelka caafimaad laga bixiyey, iyo sidoo kale cido u taagan cusbitaalkan si uu ugaga ururiyo xaddiyada taagan Bukaanada Siyaasaddan.

   1.4 Kaalmadda Dhaqaale. Marka la eego Siyaasadda Ku-dhaqanka UPH 1.BR.34, Kaalmadda Dhaqaale – Adeegyada Cusbitaalka, hababka kaalmada la siinayo Bukaanada la go'aamiyey inay dhaqaale ahaan baahan yihiin.

1.5 Bukaanada Mutaystay-FINA. Bukaanada raaca hab-raacyada lagu sheegay siyaasaddan lana go'aamiyey inay mutaysteen Kaalmada Dhaqaale marka siyaasadda UPH la eego 1.BR.34, Kaalmada Dhaqaale – Adeegyada Cusbitaalka.

1.6 Daryeelka Caafimaad ahaan Daruuriga ah. Adeegyo (1) waafaqsan cudurka iyo daawaynta xaaladda bukaanka; (2) in la raaco istaandarrada dabbaakhadaha fiican ee caafimaad; (3) looga baahan yahay buuxinta baahida caafimaad ee Bukaanka iyo inay ahaato sababo aan ahayn habboonaanta bukaanka ama xirfadlaha ama daryeelaha bukaanka; iyo (4) nooca adeegga ugu rakhiisan kaasi oo si fiican u buuxinaya baahida caafimaad ee bukaanka.

1.7 Dulsaarka Xad-dhaafka ah. Dulsaar ka badan heerka dulsaarka fadaraalka ee muddada gaaban iyo boqolkiiba saddex oo jira wakhtigaas.

1.8 Tallaabooyinka Ururinta Aan-Caadiga Ahayn ("ECAs"). Tallaabooyinka uu qaado ama lagu qaado magaca Cusbitaalka ee Bukaan ka dhan ah si looga helo kharashka daryeelka, haddii tallaabooyinkani ku lug leeyihiin wax kamid ah waxa soo socda:

1.8.1 Gadista daynta Bukaanka.

1.8.1.1 Hase yeeshee, gadista daynta looma tixgaliyo inay tahay ECA haddii la sameeyo iyada oo la raacayo heshiis qoran oo sharci ahaan qabanaya oo shaqaynaya kahor gadista daynta kaasi oo mamnuucaya in gatuhu ku lug yeesho ECAs ama qaado Dulsaar Xad-dhaaf ah; dhigayo in daynta loo celiyo Cusbitaalka haddii Bukaanku yahay ama noqonayo Bukaan mutaystay-FINA; oo haddii Bukaanka la go'aamiyo inuu yahay Bukaan Mutaystay-FINA oo daynta aan lagu celinayn ama aanu soo ceshanayn Cusbitaalku, gatuhu waa inuu hubiyo Bukaanku inaanu siin, waajibna aanu ka saarnayn inuu siiyo, gataha iyo Cusbitaalku si wadajir ah wax kabadan waxa Bukaanka shakhsi ahaan ka masuul yahay bixintiisa maadaama uu yahay Bukaan Mutaystay-FINA.

1.8.2 U sheegista macluumaad khaldan oo kusaabsan Bukaanka wakaaladaha sheegista daynta macmiilka ama xafiisyada daynta.

1.8.3 Dib-u-dhigista ama dafirista, ama ka rabista lacagta biilal hore oo aan la bixin kahor siinta Daryeelka Caafimaad Ahaan Daruuriga ah.

1.8.3.1 Bilaa shuruud Cusbitaal uu bilaabi hawlo dayn ururin kuwaasi oo farogalinaya siinta Daryeelka Caafimaadka Gurmadka ah.

1.8.4 Ku lug yeelashada hab sharci ama caddaaladeed (tusaalayaasha waxa kamid ah bilaabista tallaabo madani ah, dayn ka doonis, la wareegista hanti ma-guurto, ama mushaharka ka goosi).

1.8.4.1 Hase yeeshee, siyaasaddan ma khusayso qaybta adeegyada Bukaanka uu bixiyey, ama ay dhici karto inuu bixiyo bixiye dhinac koowaad ama saddexaad sida shirkad caymiska baabuurta ama magdhawga shaqaalaha. Sida uu oggol yahay sharciga Gobollada Iowa, Illinois, iyo Wisconsin, marka Bukaan soo doonto adeegyada kadib shil ama dhaawac, Cusbitaalku waxa dhici karta inuu soo dhigo dayn cusbitaal oo ka dhan ah dayn bixinta cidda saddexaad, daynta ka doonistuna ayna ahayn ECA.

1.8.5 Buuxinta sheegasho dacwad busaaradsi oo kasta ma aha ECA.

1.9 Guudmarka Luuqadda Fudud ku Qoran. Dokumenti sheegaya guudmarka Siyaasadda UPH 1.BR.34, Kaalmada Dhaqaale – Adeegyada Cusbitaalka.

1.10 Bayaanka Biilka Kadib Saarista. Bayaanka biilku waxa la siiyaa Bukaan kadib marka bukaanku ka helay adeegyo daryeel caafimaad kana tagay Cusbitaalka.

1.11 Wakhtiga Dalabka. Wakhtiga ka bilaabmaya taariikhda daryeelka la siiyey Bukaanka kuna dhammaanaya kadib (1) 240 maalmood kadib Bayaanka Biilka Kadib Saarista; (2) wakhtiga kama-dambaysta ah ee lagu sheegay ogaysiiska la siiyey Bukaanka sida ku cad Qaybta 2.2.1.1. ee siyaasaddan, ama (3) wakhtiga kama-dambaysta ah ee bixinta macluumaad dheeraad ah ay dhaaftay.

2. Tilmaamaha Biilashada iyo Ururinta.

2.1 Cusbitaaladu waxay siin doonaa ikhtiyaaro macquul ah Bukaanada samaynaya dadaal daacad ah oo ay iskaga bixinayaan biilashooda. Hase yeeshee, Cusbitaaladu waxay ka filayaan Bukaanada inay bixiyaan xaddiyada taagan ee adeegyada daryeelka caafimaad ee la siiyey, waxayna bilaabi ururin marka loo baahdo.

2.2 Cusbitaaladu ku dhaqaaqi maayaan Tallaabooyin Ururin oo Aan-caadi Ahayn oo ka dhan ah Bukaanka si ay uga helaan lacagta daryeelka ilaa ay samaynayaan Dadaalo Macquul ah oo ay ku ogaysiinayaan Bukaanka jiritaanka Kaalmo Dhaqaale iyo habka loo dalbanayo Kaalmada Dhaqaale.

2.2.1 Dadaalo Macquul ah waxa kamid ah dhammaan tallaabooyinka soo socda oo Cusbitaalku qaadayo:

2.2.1.1 Siinta ogaysiis qoran (isku-dayga siin ogaysiis afka ah) Bukaanka in Kaalmo Dhaqaale ay jirto, siinta Guudmar Luuqad Fudud ku Qoran oo caddaynaya ECAs Cusbitaalku uu qaadi karo haddii loo baahdo, oo sheegaya wakhtiga kama-dambaysta ah kaasi oo dabadii ECAs la bilaabi karo kaasi oon ka horrayn 30 maalmood kadib taariikhda marka ogaysiiska qoran la siiyey.

2.2.1.2 Ogaysiinta Bukaan gudbiyey dalab Kaalmada Dhaqaale oo aan dhammaystirnayn sida loogu dhammaystiro si sax ah, iyo siinta Bukaanka fursad macquul ah o sidaas ku yeelo. Cusbitaalku waa inuu ku bixiyo ogaysiintan qoraal waana inuu siiyo macluumaadka lagala xidhiidhayo khayraadyada ka kaalmaynta Bukaanka dhammaystirka dalabka.

2.2.1.3 Qaadashada go'aan la xidhiidha mutaysiga Kaalmada Dhaqaale haddii Bukaanku gudbiyo dalab Kaalmada Dhaqaale oo dhammaystiran Wakhtiga Dalabka.

2.2.2 Haddii Cusbitaalku uu dib-u-dhigi doono ama diidi doono daryeel isaga oo kusalaynaya biilal taagan oo daryeel hore, markaa shuruudaha Dadaalo Macquul ah waa wax gaar. Cusbitaalku waa inuu siiyo Bukaanka foomka dalabka FAP iyo ogaysiis qoran oo sheegaya Kaalmo dhaqaale inay jiri karto, uuna sheego wakhtiga kama-dambaysta ah ee gudbinta dalabka FAP-kan ee daryeelkii hore. Wakhtigan kama-dambaysta ah waa inaanu ka horrayn wixii ka dambeeya 30 maalmood kadib marka taariikhda ogaysiiska qoran la bixiyo ama 240 maalmood kadib taariikhda Bayaanka Biilka Saarista Kadib ee koowaad ee daryeelka hore loo bixiyey. Haddii dalab FAP oo dhammaystiran lagu gudbiyo wakhtigan gudihiisa, markaa Cusbitaalku waa inuu uga shaqeeyo dalabka qaab la dedejiyey.

2.2.3 Haddii Cusbitaalku isticmaalo macluumaadka ay keeneen wakaaladaha dhinaca saddexaad ah si uu uga kaalmeeyo go'aaminta mutaysiga Bukaanka ee Kaalmada Dhaqaale, oo go'aamintana lagu gunaanado in Bukaankan aanu mutaysan daryeel bilaash ah sida ay dhigayso Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale, markaa Bukaanka waa in la siiyo ogaysiis go'aaminta dhinac saddexaad waana in la siiyo wakhti macquul ah si uu u dalbado Kaalmo Dhaqaale oo kale.

2.3 Cusbitaaladu isku-dayi maayaan inay ka soo qaataan bukaanka hanti laga dhaafay hawlaha ursi ee noocan ah marka la eego qaynuunka gobolka ama fadaraalka.

2.4 Haddii Bukaan uu gudbiyo dalab Kaalmo Dhaqaale oo dhammaystiran oo Cusbitaalkuna rumaysan yahay in Bukaanku uu u-qalmi karo Medicaid, Cusbitaalku waxa dhici karta inuu dib u dhigo qaadashada go'aamin mutaysi ilaa Bukaanku dalbado Medicaid oo go'aamintana la sameeyey iyada oo la eegayo mutaysigan Medicaid.

2.5 Haddii mutaysiga Bukaanka ee Kaalmada Dhaqaale aan la go'aamin, markaa Cusbitaalku wuxuu ka laaban bilaabista Tallaabooyin Ururin oo Aan-caadi Ahayn muddo 120 maalmood ah laga bilaabo taariikhda Bayaanka Biilka Saarista Kadib, iyo wixii kale ee wakhti kama-dambays ah ee lagu siiyey Bukaanka ogaysiiska ku cad Qaybta 2.2.1.1 ee siyaasadda.

2.5.1 Haddii Bukaanku gudbiyo dalab Kaalmo Dhaqaale oo dhammaystiran wakhti kamid ah inta lagu jiro Wakhtiga Dalabka, markaa Cusbitaalku waa inuu hakiyo wixii ECAs ah, go'aamiyo mutaysiga Bukaanka ee Kaalmada Dhaqaale, oo ogaysiiyo Bukaanka inay jirto Kaalmo Dhaqaale.

2.5.1.1 Haddii Bukaanku mutaystay Kaalmada Dhaqaale laakiin aanu mutaysan daryeel bilaash ah, markaa Cusbitaalku waa inuu siiyo Bukaanka bayaan sheegaya xaddiga Bukaanka lagu leeyahay.

2.5.1.2 Haddii Bukaanku mutaystay Kaalmada Dhaqaale, Cusbitaalku waa inuu beddelo wixii ECAs hore loo qaaday oo uu u celiyo wixii lacag dheeraad ah ee Bukaanku leeyahay.

2.5.2 Haddii Bukaanku uu gudbiyo dalab Kaalmo Dhaqaale oo aan dhammaystirnayn inta lagu jiro Wakhtiga Dalabka, Cusbitaalku waa inuu hakiyo wixii ECAs ah ilaa Bukaanku dhammaystirayo dalabka Kaalmada Dhaqaale oo Cusbitaalkuna go'aaminayo in bukaanku mutaystay Kaalmada Dhaqaale, AMA ilaa Bukaanku ku fashilmo inuu bixiyo macluumaad dheeraad ah ilaa ugu badnaan 240 maalmood laga bilaabo taariikhda Bayaanka Biilka Saarista Kadib ee koowaad, wakhtiga kama-dambaysta ah lagu siiyey Bukaanka ogaysiiska ku cad Qaybta 2.1.1.1 ee siyaasaddan, oo wakhtiga kama-dambaysta ah oo ka jawaabista go'aamin malayn ah ee mutaysi la'aan Kaalmada Dhaqaale oo buuxda.

2.5.3 Cusbitaalku waxa dhici karta inuu bilaabo ECAs haddii Bukaanku aanu gudbin dalabka Kaalmada Dhaqaalaha oo dhammaystiran muddo 240 maalmood ah laga bilaabo taariikhda Bayaanka Biilka Saarista Kadib ee koowaad iyo haddii haddii shuruudaha ogaysiinta la buuxiyo.

2.6 Markay tahay bukaanada ku lahaa dhacdooyin daryeel oo badan Cusbitaalka, Cusbitaalku waxa dhici karta inuu buuxiyo isla mar shuruudaha ogaysiinta markay tahay siyaasaddan. Haddii Cusbitaal isku geeyo biilashada taagan Bukaanka ee dhacdooyin badan oo daryeel, waxa dhici karta inaanu bilaabin ECA ilaa kadib Wakhtia Dalabka ee dhacdada daryeel ee ugu dhawayd.

/s/ William B. Leaver

William B. Leaver
Guddoomiyaha UPH

JADWALKA A – Adeegyada Cusbitaalka ee la Daboolay

UnityPoint Health Anamosa - St. Luke's/Jones Regional Medical Center
UnityPoint Health Cedar Rapids - Continuing Care Hospital at St. Luke's L.C.
UnityPoint Health Cedar Rapids - St. Luke's Methodist Hospital
UnityPoint Health Des Moines - John Stoddard Cancer Center
UnityPoint Health Des Moines - Blank Children's Hospital
UnityPoint Health Des Moines - Iowa Lutheran Hospital
UnityPoint Health Des Moines - Iowa Methodist Medical Center
UnityPoint Health Des Moines - Methodist West Hospital
UnityPoint Health Dubuque - Finley Hospital
UnityPoint Health Fort Dodge - Trinity Regional Medical Center
UnityPoint Health Peoria - Methodist Medical Center of Illinois
UnityPoint Health Peoria - Proctor Hospital
UnityPoint Health Quad Cities/Muscatine - Trinity Medical Center – Bettendorf
UnityPoint Health Quad Cities/Muscatine - Trinity Medical Center – Moline
UnityPoint Health Quad Cities/Muscatine - Trinity Medical Center - Rock Island
UnityPoint Health Quad Cities/Muscatine - Trinity Muscatine
UnityPoint Health Sioux City - St. Luke's Regional Medical Center
UnityPoint Health Waterloo - Allen Memorial Hospital
UnityPoint Health Madison, Wisconsin - Meriter Hospital, Inc.